Växjö kommun
Europas grönaste stad

Madasha waxbarashada ee dugsiyada loogu talagalay

Qofka adigoo kale ah oo ubadkiisa dhigto dugsiyada dowladda hoose ee degmada Växjö, waxaa idin diyaarinay madasha waxbarashada, kaasoo hab sugan lagu galo – IST Lärande. Madasha waxbarashada waxaad ku geli kartaa adigoo adeegsanayo aqoonsiga loo yaqaanno BankID, kaddib waxaad heli doontaa warbixin ku saabsan ubadkaaga ee uu maamulka dugsiga soo diray.

Madasha waxbarashada [IST Lärande skola]
Madasha waxbarashada ee dugsiyada loogu talagalay, IST Lärande skola, waxaa xilhaayeha xannaanadda/waalidka iyo ardayda loo furayaa toddobaadka 45-aad, oo ku beegan toddobaadka ku xiga fasaxa xilliga dayrta. Markaas wuxuu xilhaayeha xannaanadda/waalidka kari karaa in uu madasha guda galo, isagoo adeegsanayo aqoonsiga loo yaqaanno [BankID]. Kaddib wuxuu helaya warbixinta dugsiga ee ku saabsan ubadkiisa. Ardayda waxay madasha ku geli karaan iyagoo isticmaala isla xogta guda gelida ay isticmaalaan markii dugsiyada ay ku sugan yihiin.

Bogga internetka www.vaxjo.se/larplattform waxaa laga helaa xiriiriye halka laga galo madasha waxbarashada. Isla boggaas waxaa xitaa laga daawan karaa filim dardaaraan oo gaaban oo loogu talagalay xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta.

Madasha waxbarashada ee dugsiyada loogu talagalay, waxay ku sugan tahay heerka biloowida. Sidaas awgeed, maamulka dugsiyada wuxuu waalidiinta siin doonaa warbixin dheeraad oo ku saabsan ilmahooda, taasoo lagu soo bandhigi doono madasha.

Daawashada loogu talagalay xilhaayeha xannaanadda/waalidka
Qofka ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka wuxuu heli doonaa fursad u ku aqristo waxrbixin ku saabsan ubadkiisa, sida fikradda laga qabo, warbixintii wadahadalka ka arrinsashada horumarka waxbarashada ee ardayga, laakin xitaa la qabsiin, digniin shahaadooyinka xiriir la leh ama barnaamij waxkaqabadyo ku salaysan. Markii warbixin cusub oo gaar ahaan ku saabsan ardayga la soo bandhigo madasha waxbarashada, waxaa waalidka lagu wargelinayaa e-mail ee uu ku soo gudbiyay had-dhiska Dexter.

Qofka adigoo kale ah oo ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka, ma doonaysaa inaad aragto muuqaalka madasha waxbarashada ? Xaaladaas waxaad www.vaxjo.se/larplattform ka daawan kartaa filimka gaaban ee dardaaranka. Haddii aad u baahan tahay warbixin faahfaahsan ee xiriir la leh hab-shaqaynada kale, waxaad ka aqrisan karta isla bogga.

Madasha waxbarashada waxaa kaloo laga hela [blogg]. Waa goob ay maamulada dugsiyada qoraal u soo qoran hal, dhawr ama dhammaan xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ardayda dhigata fasal gaar ah, koox ardayeed ama ardayda dugsiga oo idil.

Växjö kommun, utbildningsförvaltningen, 0470-410 00, utbildningsforvaltningen@vaxjo.se

SOM_Larplattform skola, informationsblad.indd 1 2018-11-20 15:15:49

Växjö kommun
Europas grönaste stad

Wargelinta ku salaysan e-mail ee madasha waxbarashada laga soo diro
Markii arrin cusub lagu soo bandhigo madasha waxbarashada, kaasoo ku saabsan ubadkaaga waxaa lagu soo diri doonaa e-mail, kaasoo adreeskiisa nalaga soo gudbisay habdhiska Dexter. Markaas kaddib waxaad ku geli kartaa adigoo isticmaalayo aqoonsiga loo yaqaanno [BankID], kaddib ayay suurtagal noqon karta inaad warbixinta aqrisato.

Qofka aan rabin in farimaha e-mail loo soo diro, wuu iska xiri kara laakin biloowga wuu furan yahay. Sidaas awgeed, qofka ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka waxaa loo soo diri doonaa farimaha e-mail waa haddii usan iska xirin.

Daawashada loogu talagalay ardayga
Markii qofka ardayga ah uu guda galo, isagoo adeegsanayo xogta gelida ee isaga u gaarka ah, wuxuu kaddib helayaa fursad uu ku aqristo warbixin gaar ahaan isaga ku saabsan. Sida aragtida iyo qiimaynta macallinka, haddii qorshaha la qabsiin u jiro, digniin xiriir la leh shahaadada iyo barnaamijka waxkaqabadyada. Sidaasoo kale, wuxuu ka aqrisan karaa warbixin ku saabsan wadahadalka ka arrinsashada horumarka waxbarashada ee ardayga [utvecklingssamtal]. Macallinku ayaa warbixin dheeraad ka bixin karo wararka kale ee laga aqrisan karo madasha waxbarashada. Ardayga waxaa loo soo diri doonaa fariimaha e-mail, kuwaasoo lagu soo hagaajiyo adreeska u maamulka dugsiga siiyay.

Guda gelida iyo nabadsugidda
Sida u qofku ku aqristo warbixinta la soo bandhigay madasha waxbarashada [IST Lärande skola] awgeed, waa in qofka ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka uu ku guda gala madasha, isagoo isticmaalayo qaabka loo yaqaanno [flerfaktorsinloggning]. Guda gelida darteed waa in uu isticmaala aqoonsiga loo yaqaanno [BankID] ama [mobilt BankID]. Warbixin dheeraad oo ku saabsan aqoonsiga [BankID], waxaa laga aqrisan karaan barta internetka ee Guddiga arrimaha aqoonsiga elektroonikada [e-legitimationsnämnden] www.e-legitimation.se. Haddii waalidku u leeyahay ilmo dhigta dugsi iyo kuwa laga xannaanadeeyo dugsiga xannaanadda, waa in mid kasta gooni ahaan u guda gala, sida madasha dugsiga iyo madasha dugsiga xannaanadda. Xiriiriyeyaasha guda gelida waxaa laga hela www.vaxjo.se/larplattform.

Ardayda waxay ku guda galaan iyagoo isticmaalayo xogta guda gelida ee iyaga u gaarka ah, sida kuwa ay isticmaalaan markii dugsiga ay ku sugan yihiin, oo ah isla tana ay e-mail ama ku guda galaan kombyuutarradooda.

Loogu talagalay qofka aan haysan aqoonsiga [BankID]
Qofka aan haysan aqoonsiga loo yaqaanno [BankID] – wuxuu warbixinta ku saabsan ubadkiisa ku heli karaa siyaabo kale, sida haddii u la xiriiro dugsiga ama dugsiga xannaanadda ee ubadkiisa.

www.vaxjo.se/larplattform

Växjö kommun, utbildningsförvaltningen, 0470-410 00, utbildningsforvaltningen@vaxjo.se

SOM_Larplattform skola, informationsblad.indd 2 2018-11-20 15:15:49